



Takoorida la xiriira Guryaha

Housing Discrimination

Dad kala sooc ama takoorid caynkee ah ayaa sharci darro ah?


Gobolka Minnesota, ma aha in cid gurigaaga maamushaa ay kuula dhaqanto si ka duwan sida dadka kale ay ula dhaqanto iyadoo sababtu tahay:

- Qolo
- Jinsi
- Midab
- Diin
- Qoyska (ilmaha haysata ama uur leh)
- Cayr qaata (MFIP, GA, SSI, iwm.)
- Jiheynta galmada (rag- dumar kii aad la galmooto)
- Aqoonsiga jinsiga
- Guur (iskaabulo ah ama garoob)
- Naafada
- Qolada aad u dhalatay
- Da'da (St. Paul uun)
- Caqiidada (iimaanka)

Maxay yihiin calaamadaha lagu garto dad kala sooca ama takoorida?

Codsi diiid

- Markii aad telefoonka wacdo, gurigii waxaa lagu yiri waa banaan yahay. Laakiin marka mulkiilaha guriga lahi uu midabkaaga arko, “gurigaa jaa waa la kireeyey” ayuu oran.
- Mulkiilaha guriga lahi wuxuu oran “MFIP cid qaadata lama ogola” ama “lama ogola cid la siiyo gargaarka degdeg ah (no emergency assistance).”
- In la diido in guri lagaa kireeyo iyadoo sababtu tahay naafanimadaada, in kastoo naafanimadaasi aysan kaa hor istaagayn in aad u hogaansato sharciga guriga. Eeg Warqada AKhbaarta ee [Reasonable Accommodations](#).
- Mulkiilaha guriga oo yiraa “caruur ma ogolin,” isagoo gurigu uusan ahayn guriyaha waayeeelka kaliya loo ogol yahay in ay degaan.
- Maamulaha guriga oo dadka soo codsata guriga kala sooca. Tusaale ahaan, waxa ay ku yiraahdaan dadka qaata cayrta la yiraa MFIP ka waxa aad u baahan tihiin in uu idin soo galo dakhli kirada 3 goor ka badan, laakiin sidaa kuma yiraahdaan dadka aad cayrta qaadani ee guri doonka ah.
- Codsigaagii marnaba lama eegin sababtoo ah diiintaada.



Si kala duwan ula dhaqanka dadka

- Qofka guriga hagaajiyaa wuxuu wixii ka halaaba u hor hagaajiyaa dadka cadaanka ah ka hor inta aanu wax u hagaajin dadka laatiink ah.
- Maamulahu gurigu waxa uu u si gaar ah ugu fiirsadaa una ciqaabaa wixii xad gudub ah ee uu yiraa waxaa guriga ku sameeyey dadka madow ah.
- Mulkiilaha guriga kuma uu sameeyo is bedelo yar yar xeerka guriga si uu ugu ogaalado in qof naafo ahi uu halkaa si fiican ugu noolaado. Tusaalo ahaan, in uu ogolaado in uu xayaawaan yar guriga ku haysan karo. Eeg warqadayada Akhbaarta [Can I Keep a Pet?](#)
- Ururada dadka guriga wada leh (townhome association) oo diida in guryaha lagu rakibo xakabad yar oo dadka naafada ah ee kursiga lugaha leh ku socdaa ay isticmaali karaan si ay sahal ugu galaan guriga. Eeg warqadayada akhbaarta [Reasonable Accommodations](#).
- Jiritaanka sharci gaar ah oo qaabilsan ilmaha kaliya ama maamulahu wuxuu ka kireeyaa qoysaska ilmaha leh abaarmantiyada ku yaal dhulka ama dabaqa koowaad uun.



Khashkhashaada

- Qofka guriga hagaajiyaa oo kugu khashkhasha shukaansi, ama gurigaaga iska soo furta oo iska soo gala. Eeg warqadayada akhbaarta [Sexual Harassment in Housing](#).
- Waardiyaga guriga oo qofka ku soo booqday si ka duwan sida dadka kale ula dhaqma waayo qofkaa ayaa ah qofka u dhashay Hindida Mareykan ka (American Indian).
- Dariska oo isku daya in ay xoog kaaga saaraan xaafada iyagoo adeegsanaya cay cunsirinimo ah iyo hanjanaad iyo caga-jugleyn.

Maxaa ka sameyn karaa arrimhaa?

Hadii lagu diiday in abaartaminto lagaa kireeyo aadna ka shaki qabto in sababta laguugu diiday in ay la xiriirto dad kala sooc, soo wac telefoonka markiiba si lagu caawiyo.

Waxa aad oron kartaa qof taqaan wac oo codso in mulkiilahu kaa kireeyo guri ka dibna eeg sida mulkiilaha gurigu uu ula dhaqmo qofkaa. Tusaale ahaan: hadii aad ka shaki qabto in laguugu sameeyey takoorida ku salaysan jinsiyad, eeg in qof jinsiyada kale u dhashay loola dhaqmo sidii adiga laguula dhaqmay si dhaanta. Meel ku qoro waxa dhaca mar walba iyo cida aad adiga iyo qofka saaxiibkaa ahi aad la hadasheen.

Hadii si xun laguula dhaqmo ama meesha aad ku nooshahay laguugu khashkhasho, warqad u qor mulkiilaha. Warqadaa nuqul kala har xafidna wixii daliilo kale ee takoorid ah ee aad hayso. Isku day inaad hesho makhraatiyaal wax maqlay ama arkay akhbaartoodana hay. Meel ku qoro mar kasta oo wax dhacaan. Hadii aad khatar ku jirto, caawimaad waco.

Dacwada iyo u Cabashada Hay'ada

Waxa aad bilaabi kartaa dacwo si aad u joojiso dad takoorka mar marka qaarkoodna lacag mag dhow ah ayaad heli. Haddii aad u baahan tahay fal deg deg ah in la sameeyo si aad u hesho abaartaminto, ama aad u joojiso khashkhashaad, ama aad uga hor tagto guri ka saarid, dacwo waa waxa kaliya ee kuu furan. Haddii aad dan yar tahay wac xafiiska Gargaarka sharciga

Haddii aad tahay qof dar yar oo dakhigiisu hooseeyo, wac:

The Housing Discrimination Law Project (HDLP)

Barnaamijka Sharciyada Dad kala Soocida Guryaha

(612) 334-5970

ama

Housing Equality Law Project (HELP)

Barnaamijka Sharciyada Sinaanta Guryaha

(651) 222-4731

Waxaad kaloo ka raadin kartaa caawimaad hay'adaha dowlada ee ilaaliya sharciyada dad kala soocida la'aanta ee guryaha. Baaritaano ayey sameeyaan iyadoon wax lacag ah la iska rabin. Haddii ay soo helaan in dadka soocid dhacday, waxay eegi marka hore in heshiis laga gaari karo arrintaa. Haddii aan wax heshiis ah laga gaarin arrinta, hay'adu waxaa laga yaabaa in ay dacaweesyo cida takooriga kugu sameysay adiga. Hay'adahaasina waa:

MN Department of Human Rights

Freeman Building
625 Robert St North
St. Paul, MN 55155

MN Department of Human Rights – St Cloud

City Hall
400 Second St South
St. Cloud, MN 56301

Foon: (651) 539-1100 or 1(800) 657-3704
TTY: (651) 296-1283

Foon: (320) 650-3133

www.mn.gov/mdhr/

Housing and Urban Development (HUD)

77 West Jackson Boulevard
Chicago, IL 60604-3507
Foon: (800) 765-9372

www.hud.gov

Wax kasta oo aad ku tashato in aad sameysyo degdeg u samee. Kiisaska, Intooda badan waxa aad u baahan tahay inaad dacwooyinka ama cabashooyinka 1 ama 2 sanno gudahood aad ku soo xareysyo.

Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.